



**Waqtiyada cuntada
ee dugsiga xannaanada
iyo barbaarinta carruurta**



Kiruna kommun

Qudaar macaan iyo mid cagaaran

Xilliyada cuntada oo dhan waxaa la bixiyaa qudaar mac-macaan iyo/ama qudaar cagaaran.



Kushiinka dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta

Degmada Kiruna waxaa ku yaalla 23 kushiin oo dugsi xannaano iyo barbaarin carruureed ah oo 11 ka mid ahi ay yihiin kushiinno wax lagu kariyo, 9 waa kushiinno adeeg, 3 waa kushiinno qaabiltaan. Kushiinka wax kariska waxaa lagu kariyaa, laguna diyaariyaa quraac, qado iyo conto dhextaal. Kushiinnada adeegista- iyo qaabilaadda waxaa lagu diyaariyaa quraac iyo conto dhextaal, qadadana waxaa looga qaabilaa koshiinka dhexe iyadoo kuleyl ah.



Cunto iyo jawi

Hawsha waqtiga cuntada ee degmada Kiruna waxaa ay ka shaqeyneysaa si ay gacan uga geysato jawi wanaagsan. Waxaannu sida ugu badan ee suurta gal ah u adeegsaneynaa raashin si dabiici ah loo tacbay, waxaanuna ku dadaaleynaa in aan yareyno cunto ku dheelidda. Waxaa taas dheer in aanu dooraneyno in aanu bixinno qudaar macaan oo cusub iyo qudaarta cagaaran ee xilliga.



Waqtiyada cuntada ee dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta

Cuntada laga bixiyo dugsiyada xannaanada iyo barbaarinta carruurta ee degmada Kiruna wax sax ah ayey ka sameysan yihiin xagga nafaqada. Hadafkeenu waa in ay cuntooyinku si macaan u dhedhemaan, si qurxan u muuqdaan, laguna cuno jawi wanaagsan. Marka dhammaan cunta la bixinayo shaqaalaha dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta waa ay caawiyaan. Barayaashu waxaa ay sidoo kale noqonayaa kuwo ku dayasho mudan oo meel fiican ka taagan cuntada.



Cuntadu waa mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee carruurta caafimaad wanaagsan u leh. Canugga dhigta dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta qeyb weyn oo maalmihiisa ka mida wuxuu wax ka cunaa dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta. Sidaas darteen hab nololeed caafimaad leh oo leh caadooyin cunto oo wan-wanaagsan waxaa sidoo kale lagu taageeri kara dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta.

Cuntooyin kala duduwan

Dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta waxaa maalin walba laga bixiyaa quraan, qado iyo cunto dhextaal kala duduwan oo ku saleysan wareegga cuntada qeybihiisa oo dhan, waqtiyo joogto ah. Xilliyadeenna cuntada oo dhan waa kuwo nafaqadooda la xisaabiyo. Cuntooyinka badankooda waa la kariyaa billawga horaba oo kuma jiraan waxyaabaha aan loo baahneyn oo lagu daray.



Qadada waxaa ku jira cunto qayriin iyo ansalaato, rooti adag, Norrgott, caano dhexdhexaad ah subag ahaan oo si dabiici ah loo soo saaray iyo qudaar macaan.

Quraacda iyo cunto dhextaalka waxaa sida weyn la bixiyaa caano waxyaabo kala duwan oo ka mid ah caano/garoor dabiici ah/yagoorto, qashar yar/musli/mashaaryo, miro/wax la ridqay/malmalaaddo, ismaris wax la saaray iyo qudaar macaan iyo mid cagaaran.



Cunto gaar ah



Carruurta u baahan cunto gooni ah waa in ay sidoo kale helaan duruufo u saamaxaya caado cunto oo wanaagsa lana siiyo cunto buuxineysa nafaqada lagu tala bixiyay.

Haddii canuggaagu uu baahi u qabo cunto gooni ah waa muhiin in aad taas u sheegtid dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta.

Dalbashada cunto gaar ah waxaan lagu sameynayaa foomka “Cunto gaar ah” Soo raaci sidoo kale warqad dhakhtar. Foomka waxaa laga qaadanayaa loona dhiibayaa kushiinka canuggaaga dugsigiisa xannaanada iyo barbaarinta carruurta.

Haddi la maqnaanyo

Mahadbaanu ku haynaa haddii aad la xiriirtid dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta saacadda 7.30 ka hor haddii canuggaagu uu dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta ka maqnaanyo, macnaha uusan cunta cuneynin, tusaale ahaan marka fasax uu yahay ama xanuunsanayo.

La xiriir

Wax ma iska weydiineysaa cuntada dugsiga xannaanada diyo barbaarinta carruurta waanu kugu soo dhaweyneynaa in aad la xiriirtid kushiinka dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta.

Fadlan booqo barteenna intarneedka!

Barta intarneedka waxaa ka mid ah waxyaabaha ku jira warqado cunto oo loogu tala galay dugsii kasta oo xannaano iyo barbaarin carruureed.

<http://www.kiruna.se/Kommun/Barn-utbildning/Maltidsverksamhet/Test/>

DEGMADA KIRUNA

Maamul carruurta- iyo waxbarasho

Jenny Lejon, madax cunto, Kushiin dugsii xannaano iyo barbaarin carruureed.

Talefoon: 0980-70037

Mail: jenny.lejon@skola.kiruna.se